



**Manchester Academy**  
The best in everyone™  
Part of United Learning

**Make Manchester  
Magic**

Waxay muhiim u tahay mustaqbalka ilmahaaga in uu iskuulka u yimaado si joogto ah. Waalidka ayaana ka mas`uul ah in ilmuhu helo tacliin buuxda. Sidoo kale inaad la hadasho ilmahaaga iyo macalimiinta waxay kuu sahleysaa inaad ogaato sababta ilmahaagu uusan u doonayn inuu aado iskuulka. Imaatinka wanaagsan ee iskuulku wuxuu tusayaa in ilmahaagu uu tiigsanayo mustaqbal fican.

Manchester Academy waxaan kaydinaa macluumaadka ku saabsan imaatinka iyo maqnaanshaha ardayda subaxdii iyo galabtiiba. Haddii ilmahaagu uusan imaan Karin iskuulka u soo sheeg iskuulka sida ugu dhaqso badan.

Iskuulku wuxuu u gudbiyaa maqnaanshaha ardayga maamulka degmada, sharci ahaan carruurta oo dhan waa inay helaan tacliin buuxda waalidka ayaana ka mas`uul ah inuu ilmuhu si joogto ah u yimaado iskuulka. Haddii ilmuhu aanu u imaan iskuulka si joogto ah waxa dhici karta in waalidiinta la ganaaxo

Si uu ilmahaagu u yimaado iskuulka waa inaad samaysaa waxyaabahan:

- Fahamsii muhiimadda ay leedahay imaatinka iskuulka
- Weydii inuu haysto shaqo guri kuna dhiirigeli inuu ka qayb qaato nashaadaadka ka socda iskuulka.
- Weydii in wax dhibaato ah ka haysato dhanka iskuulka kalana hadal macalimiinta iyo maamulaha haddiiba ay dhib jirto.
- Ha ka yeelin inay guriga u joogaan xanuun iska fudud.
- Ku dadaal inaad ballamaha u samayso ilmahaaga waqtiyada aysan iskuulka lahayn sida fasaxyada iskuulka ama iskuulka ka bacdi.
- Ha ku tashan in Manchester Academy ku siin doonto fasax aad ku aado meel kale xilliga iskuulku furan yahay.

Waxyaabaha saamayn ku yeesha imaatinka ardayda ee iskuulka:

- In la cabsi geliyo ama lagu maago iskuulka dhexdiisa
- Dhanka xaalada guriga ay ku nool yihiin
- Gaadiidka ay ku imaanayaan iskuulka
- Dhanka dhaqaalaha iyo daryeelka

Manchester Academy waxay ku dhaqantaa 5 qodob oo aasaas u ah imaatinka iskuulka taas oo muhiim u ah in dhamaan ardaydu horumar ka sameeyaan dhanka imaatinka iskuulka. Waxaa muhiim ah in waalidka iyo iskuulku ay yeeshaan wadashaqeyn wanaagsana Sidoo kale waxaan ku dadaalnaa inaan ogaano waxyaabaha keeni kara hoos u dhaca ku yimaada imaatinka iskuulka sida xanuun dhanka maskaxda ah, aaminaad la`aan, xidhiidhka iskuulka iyo waalidka oo xumaada



**Foundation 1**  
Whole School Thinking  
Culture & Climate



**Foundation 2**  
Supportive Policies,  
Systems and Processes



**Foundation 3**  
Professional Learning  
Staff Development



**Foundation 4**  
Implement Targeted  
Programmes And Intervention



**Foundation 5**  
Connect Appropriately With  
Approaches To  
Behaviour Management